HSIB

HEALTHCARE SAFETY
INVESTIGATION BRANCH

FAMILY INFORMATION 08-SOMALI

BAARITAANKA HSIB

Macluumaadka qoyska

Waxaa soo gudbin loo soo diray Laanta Baaritaanka Badbaadada Daryeelka caafimaadka (Healthcare Safety Investigation Branch) (HSIB) si aan u qabanno baaritaan qayb ka ah xeeladda qaran ee badbaadada dhalmada.

Waxaan garanaynaa in ay dhici karto in adiga iyo dadka kuu dhow aad ku jirtaan waqti dhib ah, waxaanan kaaga mahadcelinaynaa waqtiga aad na siisay si aad noola hadasho. Marka aad annaga nala wadaagto waayo aragnimadaada waxaad hagi doontaa baaritaankayaga waxaanad naga caawin doontaa in aan eegno meelaha la wanaajin karo si loogu faa'iideeyo dadka kale.

Baadhitaanku ma qabsoomayo ogolaansho la'aantaada. Sidee ayaad aceshay inaad ugu lug yeelato waa ikhtiyaarkaaga waxaadna beddeli kartaa maskaxdaadu.

SU'AALAHA LAGA YAABO IN AAD KA QABTO BAARITAANNADAYADA DHALMADA

Waa maxay HSIB?

Annagoo hawlgalnna ilaa bishii Abriil 2017, waxaan baaritaanno madaxbannaan ka qabannaa dhammaan adeegga NHS (Adeegga Caafimaadka Qaran) ee England. Waxaan diiradda saarnaa beddelaadda nidaamka halkii aan dad gaar ah eedda ka saari lahayn, waxaanan isku wadnaa in aan hoggaaminno wanaajinta heerka qaran. Waxaan marti u nahay Wanaajinta adeegga NHS (NHS Improvement) waxaanan maalgelin ka helnaa Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulsheed (Department of Health and Social Care); hase yeeshee, waxaan wax u qabannaa si ka madaxbannaan ururrada isbitaal, nidaamiyeyaasha adeegga NHS iyo ururrada kale ee adeegga NHS.

Maxay HSIB u qabanaysaa baaritaannada dhalmada?

HSIB waxay wadaa baadhitaan dhamaystiran oo madaxbanaan oo lagu hormarinayo badbaadada hooyada taas oo waafaqsanAmaradeena Waaxda Caafimaadka iyo Daryeelka Bulshada. Tani waxay sheegi doontaaa xaqiiqooyinka waxa dhici doonaa mar kasta oo waxa ay samaynaysaa talo bixin. Waxaanu sidoo kale isku dari karnaa natiijooyinkeena warbixinteeda waxaana ka baranaynaa waxbarasho balaadhan.

Maxay HSIB u baaraysaa waxa ku dhacay dhallaankayga/xubinta qoyskayga?

Tilmaamaheena HSIB waxay farayaan in ilmaha dhan in la baaro ilmaha(ugu yaraan 37 37 todobaad dhamaystay) oo ku dhashay fool oo natiijooyinka hoose mid uu soo baxay:

- **Ilmo dhilidka gudah.** Marka loo maleeynayay inuu ilmaha nool yahay marka hore ee foosha laakiin aanu ku ilmaha wax astaan ah oo nolol ah.
- **Dhimashadadhalashada hore.** Marka uu ilmaha dhinto dhowrka toddobaad ee ugu horaya noloshiisa (0-6 maalmood) wixii doonaaba ha keenee

- Surtgalanimada dhawaca darran a:masxkadda ayaa la ogaaday toddobaad maalmood ee ugu horaysay nolosha, markii ilmaha:

  - waxaa laga helay heerka III hypoxic ischaemic encephalopathy (HIE).

  - qabawga xanuun (kaliya qabawga firfircoon).

  - waxaa isdhimay codka dhexe wuuna uu miyir beelo oo uu yeesho nooc suuxdin ah.

Ma baadhi doono ilmaha natiijadoodu ay ka timid shayga cufan ee xidha.

SHARAXA FOOSHA WAXAA KA MID AH:

- Wixii fool ah uu sheegshaqaalaha caafimaad, oo ay ku jiraan wajiga foosha oo kayar 4 cm furankiisu.

- Marka ay islaantu lasoo hadasho waaxda si ay ugu sheegto wixii ahwalaaca foosha, tusaale ahaan (laakiin ma ka xadidna) calool xanuun, anburka ama in laga shakiyo inay yixdudhilaacdo.

- Dedejintafoosha ah.

- Marka ballanka loo arko inuu nool yahay kadib marka laga shakiyo ama la xaqiijiyo inay yixdu bururtay.

Iyada oo la socoto amarada ma baadhno kiisaska dhalmada ayna hooyadu foolan. Tusaale ahaan, qaliin kaas oo la sameeyay ka hor hooyada inta ayna bilaabin nabur foosha amayixda oo dilaacdo.

Waxaanu sidoo kale baadhnaa dhimshada hooyada ee tooska ah ama dadban inta uurka ay leedahay ama 42 maalmood kadib marka ay dhasho.

Dhimasho tooska ah waxay kamid ah kuwa sababtocaqabado xaalad uurka (uur, fooshal iyo dhalmada kadib), ka dhax galka, ka tegista wixii daawayn khaldan ama silsilad dhacdooyin ah oo ka yimaada wax kamid ah kuwa sare.

Dhimashada dadban waxaa ka mid ah kuwa ay keenaan xanuun hore u jiray ama xanuun la qaaday intii uurka la lahaa kaas oo aan toos uga iman caqabada keeney ee tooska ah, laakiin kaas oo abaabulay saamayn jidheen oo uurka ah oo mudada uurka ah - (inta lagu jiro ama 42 maalmood gudaheed marka uurku meesha ka baxo).

Waxaanu baadhi kartaa dhimashada Hooyada qaar kuwaas oo aan hoos iman laba qaybood ee sare.

Amaradeena waxaa kamid ah baadhitaanka kiiska halkaas oo ay noqon karta sababta keentey isdilista.

Maxaa dhacaya haddii aanan rabin in aan baaritaanka ka qayb qaato?

Waxaan annagu rabnaa oo aan qiimaynaynaa oggolaanshahaaga si aan baaritaan uga qaadno daryeelka la bixiyey. Haddii aadan rabin in aad oggolaanshahaaga bixiso, ama aadan u arkin in aad hadda ka go'aan gaari karto, fadlan ha ka waabanin in aad u sheegto xubin shaqaalaha ka mid ah. Waxaad badali kartaa go'aankaaga, oo aad oggolaanshahaaga la noqon kartaa ama xaqiijin kartaa waqti kastoo aad rabto.

Yaa waaye kooxda baadhaysa hooyoonimda?

Baadhitaanadawaxaa samaynaya shaqaalaha HSIB oo loo tabo baray baadhitaanka oo aqoon iyo khibrad kala duwan leh.

Sidee ayay u eekaan doontaa warbixinta baaritaanka dhalmadu?

Warbixinta baaritaanka waxaa ku jiri doona qodobbada tixraaca ah, kuwaasoo diiradda loogu saari doono baaritaanka. Kuwan adiga ayaan wadajir kuula dejin doonnaa. Waxaa taas weliba lagu qeexi doonaa hawsha baaritaanka, caddaynta la soo guray iyo talooyinka ku saabsan wanaajinta laga samayn karo heerka urur iyo heerka qaran labadaba. Waxaad fursad u heli doontaa in aad warbixinta akhrisato oo aad ka faallo bixiso ka hor inta aanan la gabagabaynin.

Yaa masuul ka noqon doona hubinta in talooyinka la hirgeliyo?

Talooyinka badbaadada waxaa lagu hagaajin doonaa dadka ay HSIB u aragto in ay kaalinta ugu fiican ugu jiraan kuwaas oo hore u socodsiinaya. Waxay tani noqon kartaa heer hoose (Ururka isbitaal) ama heer qaran (matalan Kulliyadaha Boqortooyada ama nidaamiyeyaasha).

Yaa arki doona warbixinnada ugu dambeeya?

Warbixinnada ugu dambeeya waxaa laga saaraa magacyada waxaana la idinla wadaagaa adiga, shaqaalaha ku lug lahaa iyo ururrada kale ee habboon. Sidoo kale, meelo daruuri ah oo wax laga barto ayaa lagu daabici doonaa bartayada internetka.

Maxaa dhacaya haddii aan halin baadhitaanka HSIB?

Ogolaansho la'aantaada ma baadhi karno oo masuuliyada samaynta wixii baadhitaan ah waxay dib ugu noqonaysaa Hay'ada.

MAXAAD KA FILAN KARTAA KOOXDA BAADHITAANKA

- Kooxda baadhitaanku waxay la hadli doonaan dadka muhiimka ah. Tan waxaa caadiyan loo sameeyaa waraysi foolka fool ah. Haddii aad u aragto inay kuu fududahayinaad ku lug yeelatoqaab kale (sida, qoraal ama taleefoon), waxaanu kaala hadli doonaa ikhtiyaaro kala duwan adiga, oo ay ku jiraan taageero dheeraad ah oo aad u baahan karto.

- Waxaa kooxda ka mid noqon doona shakhsiyaad si gaar ah loo soo magacaabay oo loogu tababbaray in ay adiga iyo qoyskaaga idinla hadlaan. Waxaad heli doontaa macluumaad gaar ah oo ku saabsan qofka ka mid ah kooxda baaritaanka ee adigu aad la xiriirayso iyo sida aad qofkaas ula xiriiri karto ama farriin u gaarsiin karto.

- Waxay baareyaashayadu shaqeeyaan Isniinta ilaa Jimcaha, 9ka subaxnimo ilaa 5ta galabnimo waxayna isku dayi doonaan in ay isla maalintaas ka jawaabaan farriimaha, waqtiyadan gudahood. Haddii baaraha laguu magacaabay uu sabab kaste u maqan yahay waxaan ku siin doonnaa qof kaloo aad la xiriirto.

- Baareyaashayadu waxay si kaste oo suurogal u ah ugu dadaali doonaan in ay adiga ku raaxo geliyaan waqtiga ay adiga kula xiriirayaan. Waxay isku duba ridi doonaan waqtiga iyo goorta aad wada kulmaysaan, waxayna isku dayi doonaan in ay hubiyaan in uu xiriirku u dhaco si adiga kugu habboon. Tusaale ahaan, waxaa laga yaabaa in aad mararka qaar magacaabato qof kaloo adiga kuu hadla haddii aad u aragto in aadan laftigaagu taas awood u lahayn.

- Baaruhu waxuu kula socodsiin doonaa wixii war ah dhammaan waqtiga baaritaanku socdo.

- Marka baaritaanku dhammaado, baaraha ayaa kula soo xiriiri doona si uu natiijooyinka kuugu sheego, oo uu kaaga qaado ra'yicelinta aad ka qabto warbixinta qabyada ah.

- Baaritaannada qotodheer waqti ayay qaataan. Kooxdaada baaritaanka ayaa kuu sheegi karta qiyaas ahaan waqtiga laga yaabo in ay hawsha baaritaanku qaadato.

- Marka warbixinta kama dambaysta ah la dhammaystiro, waxaad ka heli doontaa nuqul ay ku jiraan dhammaan talooyinkayaga badbaadada ku saabsan.

WAXA AAN ADIGA KAAGA BAAHAN DOONNO

- Waxaan kaa codsanaynaa in aad na caawiso oo aad noo sheegto waxa dhacay, si aan fahan buuxa uga helno qodobbada dhammaantood. Waxaan fahansan nahay in laga yaabo in aad ku jirto waqti dhib ah waxaanan si kastoo suurogal ah ugu dadaali doonnaa in aad adiga ku taageerno, waxaanan kuu sheegi doonnaa ilaha taageerada dheeraadka ah ee aad adeegsan karto.

- Waxaan adiga kaala hadli doonnaa waqtiyada iyo goobaha ugu fiican in aan kaala soo xiriirno.

- Maadaama ay baareyaashu u baahan doonaan in baaritaanka loo fuliyo sida ugu qotodheer ee suurogal ah, waxay taasi ka dhigan tahay in aan u baahan karno in aan idinla hadalno adiga (ama qofka aad magacaabatay) in ka badan hal jeer. Haddii macluumaadka xiriirku ay isbeddelaan (matalan lambar telefoon oo cusub), waxaa muhiim ah in baareyaasha laga soo wargeliyo isbeddelkan.

WAR DHEERAAD AH OGOW

Iimayl: enquiries@hsib.org.uk
Websaytka: www.hsib.org.uk

MAGACA BAARAHAAGA IYO MACLUUMAADKA LAGALA XIDHIIDHAYO

MAGACA BAARAHA		
TALEEFONKA		
IIMEEL		

Fadlan kala hadal baarahaaga hadii wax kamid ah qoysku ay warqadan ku rabaan luuqad ama qaab kale. Wixii macluumaad ah ee dheeraad ah ee ku saabsan HSIB fadlan booqo websaytka; **www.hsib.org.uk**

WWW.HSIB.ORG.UK
@hsib_org